**HESHIISKA KA QAYB QAADASHADA ISTICMAALAHA**

Kani waa **HESHIISKA KA QAYB QAADASHADA ISTICMAALAHA** ("Heshiiskan"), wuxuu hirgelayaa taariikhda la filayo ee hoose ("Taariikhda la fulinayo"), ee la galay ee u dhaxaysa Shirkada dhijital baromeys (Digital Promise) ("deeq-bixiyaha") iyo ____________________ ("Isticmaalaha" ama "adiga" ama "Idinka") si wadajir ah loogu tixraaco ama loo yaqaan a "xisbiyada ama qaybaha "

**Saxiixaaga, waxaad kuqiraysaa oo aad ogolaatay waxyaabahan soo socda:**

**UJEEDO**

1. Waxaad heli doontaa qalabka internet-ka ee bilaa fiilada ah iyo adeeg aan lacag lahayn si loo fududeeyo ka qaybgalkaaga Barashada barnaamijka cusub ee Verizon (Verizon Innovative Learning). Qalabka internet-ka ee bilaa fiilada ah iyo adeegga waxaa kuugu deeqay shirkada bixisa adeega internet-ka aan fiilada lahayn ee Verizon waxaana bixiya Deeq-bixiyaha iyadoo la eegayo shuruudaha Heshiiskan. Heshiiskan way joojin kartaa wakhti kasta shirkada bixisa adeega internet-ka ee Verizon Wireless sabab kasta. Waqtiga Heshiiskaan wuxuu ka bilaabmayaa taariikhda fulinta ilaa waqtigaa aad kajoojiso ka qaybqaadashada firfircoon barnaamijka.

**QALABKA INTERNET-KA AAN FIILADA LAHAYN IYO ADEEGYO**

2. Qalabka aan fiilada lahayn (wireless) waxaa loogu talagalay isticmaalkaaga oo kaliya, iyagoo u adeegsanaya ujeedada barnaamijka oo keliya, lamana iibin karo ama laguma wareejin karo qof kale ama shirkad. Verizon Wireless waxay bixin doontaa adeega codka iyo / ama dhaata kaliya si loo fududeeyo ka qaybgalkaaga barnaamijka; Si kastaba ha noqotee, haddii aad samayso isticmaal xad-dhaaf ah, sameyso wicitaano dibada ah / fariimo caalami ah gudaha qalabka bixiya adeega internet-ka aan fiilada lahayn, ciyaaraha tooska ah, dhagaysiga maqal iyo / muuqaal toos ah oo aan la xiriirin barnaamijka, adeegaaga waa la xadeyn doona, hoos u dhigid ama la joojin karaa ogeysiis la'aan. Dhammaadka ka qaybgalkaaga daraasadda, Verizon Wireless wuxuu joojin doonaa adeegga aan fiilada lahayn (wireless) waxaad aqbali doontaa inaad kusoo celiso qalabka deeq-bixiyaha.

**MACAAMILIDA MACLUUMAADKA LA XIDHIIDHA ISTICMAALKA QALABKA IYO ADEEGGA**

3. Macluumaadka ku saabsan isticmaalkaaga qalabka aan fiilada lahayn iyo adeegga, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xadidnayn, faahfaahinta markaad isticmaashay adeegyada xogta ama aad samaysay wicitaano iyo cidda aad garanayso, waa macluumaadka Deeq-bixiyaha, macaamiisha diiwaanka qalabka iyo adeegga. Sidaa daraadeed, macluumaadkan waxaa laga yaabaa in la helo oo lala wadaago Deeq-bixiyaha, iyo dhinacyada deeq-bixiyuhu u oggolaaday, oo ay ku jiraan Ururka Muwaadiniinta iskaashatada caalamiga ah ee Verizon("VGCCO"). Ma jirto Macluumaad shakhsiyadeed oo la aqoonsan karo ama qayb ay heli karaan ururka looso gaabiyo (VGCCO).

**SHAQEYN LA'AANTA IYO / AMA KHALKHALKA ADEEGYADA**

4. Iskaashiga Cellcod/b/aVerizon Wireless ("Verizon Wireless") ama bixiyeyaasheeda iyo alaab-qeybiyeyaashu ma laha mas'uuliyad khasaaro kasta oo kuyimaada Isticmaalaha, sheegashooyinka ama magdhawga sabab kasta, oo ay ku jirto kuwo tooska ah, dadban, khaas ah, magdhawga, ama xaddidaadaha adeegga, oo ay ku jiraan kuwa aan la xadeyn, wixii guuldarooyin ah ama carqaladeynaya adeegyada hoos ku xusan, iyadoon loo eegin qaabka ficilka, ha ahaato heshiis ama masuuliyad ka gaabin ama kuwo kale. Xadidaadan waxaa ka mid ah khasaare, magdhow, sheegasho ama kharashyada nooc kasta oo ka soo baxa isticmaalka ama iskudayga isticmaalka adeegyada, ama awood la'aanta helitaanka taageerada nolosha ama nidaamka ama qalabka korjoogteynta, wac 911 ama E911

ama wicitaan kale oo degdeg ah ama adeeg. Laguma xisaabtami doonin ka-faa'iideyste kale ama qof sadexaad ee qandaraas kasta oo u dhexeeya Deeq-bixiyaha iyo Shirkadda Verizon.

**DHEXDHEXAADIN**

**5. DHAMAYSTIRKA ISTICMAALAHA AYAA KU RAACSAN IN, ILAA HEERKA UGU BUUXA EE SHARCIGU BIXIYO:**

(i) KHILAAF KASTA AMA SHEEGASHO KA SOO BAXA AMA LA XIDHIIDHA HESHIISKAN, AMA QALAB AMA ADEEG KASTA OO HOOS YIMAADA AMA KU XIRAN HESHIISKAN, WAXAA LAGU XALLIN DOONAA DHEXDHEXAADIYE MADAX-BANNAAN OO KU LUG LEH GAR-QAADIDDHEXDHEXAAD AH OO AY MAAMUSHO URURKA DHEXDHEXAADINTA EE MARAYKANKA ("AAA") IYADA OO LA RAACAYO GARSOORKA DHEXDHEXAADINTA KHADKA AMA ADEEGA AAN FIILADA LAHAYN ("WIA"), SIDA KU HABBOON HESHIISKAN. XEERARKA IYO QIIMAHA MACLUUMAADKA AYAA LAGA HELI KARAA AAA at www.adr.org.**DHEXDHEXAADINTU MAAHA DACWAD MAXKAMADEED. SHURUUCDA GAR-QAADIDU WAY KA DUWAN YIHIIN XEERARKA MAXKAMADDA. MA JIRO GARSOORE AMA XEERBEEGTIDA DACWAD OOGISTA INTA LAGU GUDO JIRTA GAR-NAQSIGA.**QAWAANIINTAN GAR-NAQSIGA AYAA LAGU DABAQI DOONAA WIXII SHEEGASHO AH EE KU SAABSAN ISTICMAALE-DOONKA IN AY KU DOODAAN INAY KA CODSANAYAAN DEEQ BIXIYAHA AMA VERIZON WIRELESS IYO WIXII DALAB AH EE BIXIYAHA AMA VERIZON WIRELESS AY RAADINAYSO INAY SHEEGAAN KA HOR ISTICMAALAHA U DANBEEYA.VERIZON WIRELESS WAA KA FAA'IIDEYSTAHA SADDEXAAD EE HESHIISKAN UJEEDADAAS.

(ii) ficilka gar-naqsiga federaalku wuxuu dabaqayaa heshiiskan. **XITAA HADDII LOO ISTICMAALI KARO SHARCIGU WUXUU OGOLAANAYAA FALAL ISKU MID AH NOOC AH AMA DHEXDHEXAADIN KOOXEED, ISTICMAALAHA AYAA KATANAASULAYAXAQ KASTA OO KU BURSANAYO XUQUUQDIISA KU SALAYSANKHILAAFAADKA NOOCAAS AH AMA DACWAD KA DHAN AH DEEQ BIXIYAHA AMA VERIZON WIRELESS, AMA MID KA MID AH KUWA LA SHAQAYSTA.** Haddii sheegashooyin badan oo ku lug leh hal tallaabo, qaar ka mid ah kuwaas dhexdhexaadin uma baahna, sheegashooyinka dambe waa in la sii joojiyaa ilaa iyo wixii sheegasho ah ee ficil kasta oo lagu xaliyo dhexdhexaadinayo.Haddii sheegashooyinka la sheegayo ka soo horjeedaan dhinacyo badan, qaar ka mid ah aan loo baahnayn in la dhexdhexaadiyo, sheegashooyinka la dhexdhexaadinyo waa in ay yihiin kuwo la jebiyey; Si kastaba ha noqotee, isticmaalaha u danbeeya wuxuu haynayaa isaga/iyada xuquuqda inuu u gudbiyo cabasho hay'ad kasta oo sharci ama guddi ah.

(iii) Garsooruhu uma laha awood uu ku bixinayo gargaar dheeraad ah oo ka mid ah waxa Heshiiskan ku qoran, ama lagu dalbado isbahaysi ama dhexdhexaadin kooxeed, marka laga reebo in garsooruhu go'aamiyo dalab kasoo baxaya ama la xidhiidha heshiis hore oo laga yaabo inuu bixiyo kaalmo muhiim ah oo aan saldhig u ahayn sida heshiiskan hore u oggolaan lahaa. Dhammaan dhexdhexaadinta, garsooruhu waa in uu saameyn ku yeeshaa qawaaniinta xadidaada oo ay go'aan ka gaari doonaan haddii dhexdhexaadinta arrintan la aqbalayo iyo in kale.dhexdhexaadinta kiisaska balaadhan ama isku cufan, garsoorayaashu waa inay sidoo kale raacaan Xeerarka Federaalka ee Cadaynta iyo dhinaca khasaaray waxay heli karaan guddi dib u eegis ah oo ka kooban saddex (3) garsoore.

| **Shakhsi (Isticmaalaha ):** | **Dhijital baromeys (Digital Promise) (Deeq-bixiyaha):** |
| --- | --- |
| Saxiix Halkan: | Saxiix Halkan: |
| Magaca Lagu Daabacayo: | Magaca Lagu Daabacayo: |
| Cinwaanka: | Cinwaanka: |
| Taariikhda: | Taariikhda: |

**Fadlan ku bilow xariiq kasta oo hoose si loo hubiyo fahamkaaga iyo heshiiska:**

| **Bilowga** | |
| --- | --- |
| | Waxaan fahansanahay inaan u baahanahay in aan kormeero isticmaalka dhaatada ama khadka si aysan u dhaafin 5 GB bishiiba iyo in aanan isticmaalin dhagaysiga ama fiidiyowga tooska ah marka laga reebo inta xiriirka la leh barnaamijka, iyo isticmaalka tooska ama live-ka ah ee ciyaaraha. |
| | Anigu waxaan ogolahay in aanan soo dejinin wax barnaamijyo bilaash ah ama lacag ah (barnaamijyo). |
| | Waxaan ku raacsanay in aanan isticmaalin adeegyada qalabka aan la xiriirin barnaamijka (sida: Hotspot Shakhsiga ah, Fure sireedkaSIM-ka) |
| | Waxaan ku raacsanahay in aanan ka saarin qalab kasta oo la taabankaro (iwm. jibka SIM-ka) ama softiweerka ku jira qalabka ilaa ay kuu ogolaato Verizon Wireless. |
| | Anigu waxaan ku raacsanahay inaan ku isticmaalo qalabka la ii qoondeeyey 50ka gobol ee Mareykankaoo keliya. |

| | |
|---|---|
| | Anigu waxaan oggolahay in aanan sameynin wicitaan caalami ah ama dibada ah ama dirida fariimo dibada ah, fiidiyow ama sawir qoraal leh, oo ay ku jiraan wicitaanada iyo farriimaha Kanada iyo Mexico. |
| | Haddii qalabkaaga internet-ka aan fiilada lahayn uu lumo ama la xado, waxaan oggolahay inaan isla markiiba kasoo warbixiyo ama usoo sheego: Shirkada dhijital baromeys (Digital Promise, Michael Mades), Maykal madhis. |
| | Waxaan fahamsanahay haddii qalabkaygu uu noqdo mid aan shaqeyneyn cilad soo saaraha awgeed, waxaan heli karaa hal bedelaad oo damaanad qaad ah, iyada oo si gaar ah ama doorasho ahaan ugu tiirsan VGCCO ama Verizon. Waxaan fahamsanahay haddii aan helo qalab beddel ah oo uu lumo, la xado ama waxyeello soo gaadho, oo ay ku jirto shaashada oo dillaacda, layma beddeli doono waxa aan ka bixi doona barnaamijka. |
| | Waxaan fahamsanahay haddii qalabkaygu uu lumo, la xado, ama waxyeelo soo gaadho, oo ay ku jiraan shaashada oo dilaacda, qalabka lama bedeli doono waana layga saari doonaa barnaamijka. |
| | Waxaan fahamsanahay in qalabku u yahay isticmaalkayga kaliya, si loo fududeeyo ka qaybgalka barnaamijka, iyo in aanan iibin karin ama aan u wareejin karin qalabka cid kale ama u oggolaanaysa cid kale inay adeegsato adeeggan aan fiilada lahayn (wireless) ujeedooyin aan xiriir la lahayn barnaamijka. |
| | Waxaan fahamsanahay in Verizon Wireless ama VGCCO ay hakin karaan ama joojin karaan adeegga wakhti kasta, ogeysiin la'aan. |

Anigu waan fahamsanahay haddii aan jabiyo mid ka mid ah shuruudahan, waxaa laga yaabaa in layga saaro barnaamijka waxaana waajiba in aan ku soo celiyo qalabka aan fiilada lahayn ee laysiiyey maamulaha barnaamijka (Verizon Innovative Learning).

______________________________ ________________________

Isticmaalaha                Taariikhda